Faa'iidooynka Oalbiga

– Fawá'id al-Fawá'id

Buug ka hadlaya wanaagga qalbiga,
nolosha ruuxiga ah, iyo xiririka llaahay

Ibnul Qayyim
al-Jawziyah (رحمه الله)

Turjuma:
Abdulkadir Yusuf Mohamed

Tarjumid iyo qoraal: 2025

Waxaaa loo turjumay Af-Soomali
si sahlan oo fasiran

LAGAMA GADAN KARIN

Mahadcelin & Raalli-gelin

Mahad oo dhan Ilaahay ayay u sugnaatay, Eebbe kor ahaaye oo na siiyay tawfiiqda, sabarka, iyo fursadda aan ku tarjunno kutubta kheyrka iyo cilmi-nafyeedka ah. Wuxuu Eebbe naga dhigay kuwo fahmay, qorey, uguna talagalay inay ummadda wax ku faa'iideeyaan.

Waxaan sidoo kale ka xumahay inaanan dhammeystirin tarjumaadda buugga "Fawaa'id al-Fawaa'id" ee uu qoray Imaam Ibnul Qayyim Al-Jawziyyah (رحمه الله), iyo in ay jiri karaan qaladaad tarjumaadeed, turjumid la'aan, ama meelaha aan u baahnaan kara saxid iyo faahfaahin dheeraad ah.

Wax walba oo sax ah waa fadliga Eebbe, waxa qalad ahna waa naftayda iyo Shaydaanka. Waxaan ku boorrinayaa akhristaha ama qof kasta oo cilmi leh, inuu saxid ku sameeyo meelaha aan wax ka qalday ama uu xoojiyo waxyaabaha wanaagsan.

ku bilaaw macaga ALLE si uu ALLE weyne kuugu fududeeyo

1.> Qalbigu waxa uu leeyahay baahi ka weyn baahida jidhka. Haddii qalbiga laga waayo nafaqada

toosan (ta Eebbe la xiriirto), waxa uu qalbigu noqonayaa meel qudhmay, xumaato oo jabta.

Tarjumaad & Sharaxaad: Qalbiga aadmigu wuxuu u baahan yahay cunto ruuxi ah sida jidhku u baahan yahay cunto jir ahaaneed. Haddii qalbiga laga waayo xiriirkiisa Ilaahay, cibaadada, iyo iftiinka hanuunka — qalbigu wuu burburaa, wuxuu u ekaanayaa jir gaajaysan oo xanuunsan.

2.> Qalbiga waxa uu helaa caafimaad, nolol iyo farxad marka uu la xiriiro Ilaahay — sida jidhku u caafimaado marka uu helo cunto iyo cabitaan ku filan.

Tarjumaad:

Farxadda dhabta ah iyo nasashada gudaha waxay ku timaadaa marka qalbigu barto Ilaahay, xasuusto, oo la xiriiro. Marka qalbigu Alle ka fogaado, wuu dhibtoobaa xataa haddii jidhku nasanayo.

3.> Marka qalbigu ka leexdo xaqa, qaladka wuu jecleystaa. Markii uu qalbigu bukoobo, wuxuu arkaa waxyaabaha xun-xun inuu u arko kuwo wanaagsan, kuwa wanaagsanna wuxuu moodaa kuwo xun.

Turjumaad: Qalbiga xanuunsan waa mid marin habaabay: wuxuu nacaa wanaagga, wuxuuna jecel yahay waxyaabaha dhiba. Waa sida indho la'aan ruuxeed ah — aragtidiisa ayaa qaldan.

4.> Qalbiga wuxuu ku caafimaadaa saddex arrimood:

Tawxiidka saxda ah ee Alle.

Toosnaanta niyadda iyo ficilka.

Ka leexashada damacyada nafta iyo danaha gaarka ah.

Sharaxaad: Haddii aad rabto qalbi caafimaad qaba:

1. Ilaahay keligiis rumee oo caabud.

2. U fakar si toosan oo daacad ah.

3. Naftaada iyo damacyadeeda ha u adeegsanin in aad xaqa ka leexato.

5.> Qalbiga caafimaad qaba waa mid mar walba u jeeda Eebbe, si joogto ahna u xasuusanaya. Wuxuu dareemaa raaxo iyo degganaan marka uu Eebbe la jiro, wuxuuna dareemaa cidlo iyo murugo marka uu ka leexdo xasuusta Eebbe.

Sharaxaad: Qofka qalbigiisu nool yahay, mar walba wuxuu dareemayaa farxad iyo nolosha dhabta ah marka uu Eebbe xasuusto — wuxuu ku raaxaystaa salaadda, ducooyinka, iyo cibaadada kale. Laakiin haddii uu ka fogaado Eebbe, qalbigiisu wuu ciriiriyaa, farxadna wuu waayaa.

6.> Qalbiga marka uu mar kasta ku mashquulo wax aan Ilaahay ahayn, wuxuu noqdaa meel ay buuxiyeen shaydaan, hawadiisa nafeed, iyo rabitaanno waxyeello leh.

Tarjumaad: Haddii aad qalbigaaga ka buuxiso dunida, xiisaha dadka, ama damacyo aan Ilaahay raalli ka ahayn — markaas shaydaanku wuu ku helayaa. Qalbigu wuxuu noqonayaa meel u furan dhibaatooyin ruuxi ah.

7.> Haddii qofku doonayo inuu qalbigiisa caafimaadiyo, waa inuu la dagaallamaa damacyada naftiisa iyo waxa qalbiga ka mashquuliya xasuusta Ilaahay.

Sharaxaad: Khalad ma aha in aad leedahay damacyo nolosha ah (hanti, guur, iwm), laakiin waa khalad in damacyadaasi ay kaa mashquuliyaan xasuusta iyo xiriirka aad Ilaahay la leedahay. Daawaynta qalbigu waxay bilaabataa marka aad nafta ka jebiso rabitaankeeda xad-dhaafka ah.

8.> Xusuusta Eebbe waa sida biyaha u tahay kalluunka. Sidee buu noqonayaa kalluun aan biyo lahayn?

Turjumaad: Xusuusta Ilaahay (dhikr) waxay u tahay qalbiga sida biyaha u yihiin kalluunka — haddii aad qalbiga ka goyso xasuusta Ilaahay, qalbigu wuu "eneg beelaa" sida kalluun biyaha laga saaray.

9.> Qalbiga waxaa ku dhaco xanuun daran marka uu laba arrimood isku daro:

Aqoon la’aan (jahli)

Rabitaan qaldan (hawaa)

Sharaxaad: Marka qofku uu aqoon la’aan yahay oo uu raaco damac shakhsi ah, wuxuu sameeyaa ficillo xun oo qalbiga dhaawaca. Sidaas darteed, si qalbiga loo daweeyo waa in la barto xaqa (cilmi) lana jebiyo rabitaanka qaladka ah.

10.> Cilmiga xaqa ah wuxuu la mid yahay dawada, hawada xun (nafta) na waa cudurka. Haddii cilmi la helo laakiin hawada aan la joojin, cudurka wuu sii jirayaa.

Tarjumaad: Ma filanayso in aad keliya barato diinta (cilmi) adigoon joojin dambiyada iyo rabitaanka xun. Sida bukaanka aan daawada qaata laakiin sii cuna waxyaabaha keena cudurka — sidaas ayey noqonaysaa nolosha qofka cilmiga leh ee aan naftiisa edbin.

11.> Qof kasta oo raba in qalbigiisu caafimaado, wuxuu u baahan yahay in uu si dhab ah u jeclaado Ilaahay oo uu ka jeclaado wax kasta oo kale. Taasi waa bilaawga caafimaadka qalbiga.

Turjumid: Qalbiga wuxuu bogsan karaa marka jacaylka Ilaahay ka weyn yahay wax kasta oo kale. Haddii aad jeclaato Ilaahay si ka daran sidaad wax kale u jeceshahay, qalbigaagu wuu toosan yahay, wuuna caafimaadayaa.

12.> Jacaylka Ilaahay kuma dhalan karo qalbi ay buuxiyeen wax kale. Marka hore waa in qalbiga laga nadiifiyaa waxyaabaha kale, kadibna jacaylka Eebbe ayaa geli kara.

Sharaxaad: Jacaylka runta ah ee Ilaahay ma dego qalbi mashquulsan oo buuxa — waa inaad qalbiga "faarujisaa" (ka nadiifisaa dunida, danaha gaar ah, iyo rabitaannada) si Ilaahay ugu jiro meesha ugu sarreysa.

13.> Jacaylka Ilaahay waa saldhigga toosnaanta qalbiga, haddii uu qofku Ilaahay si dhab ah u jeclaado, wuxuu ka fogaanayaa dambiyada iyo khilaafaadka.

Tarjumid: Qofka jecel Ilaahay dhab ahaan, ma fududa inuu dambiyo galo, maxaa yeelay qalbigiisa Ilaahay ayaa ka buuxa. Jacaylkaas wuxuu noqdaa difaac uu qofku isku ilaaliyo.

14.> Cibaadada Ilaahay ma noqonayso mid run ah ilaa uu qofku Ilaahay u jeclaado si ka weyn wax kasta, Ilaahay uga cabsado ka badan wax kasta, Ilaahayna ka rajeeyo wax kasta ka badan.

Sharaxaad: Cibaadada saxda ah waxay ku dhisan tahay:

Jacayl (محبة)

Cabsida Ilaahay (خوف)

Rajayn (رجاء)

Haddii sadexdaas mid la waayo, cibaadada wey daciifaysaa ama wey jabaysaa.

15.> Qalbiga ugu caafimaadka badan waa mid Ilaahay si buuxda ugu tiirsan, uga cabsada, u jeclaada, una niyadsan. Waxaa kaloo muuqda degganaan iyo toosnaan ku jirta qofkaas.

Turjumid: Qalbiga wanaagsan wuxuu leeyahay astaamo: kalsooni buuxda oo Eebbe ah, cabsi cibaado leh, iyo jacayl daacad ah. Nolosha qofkaas waa mid deggan, is dulsaar leh, oo toosan.

16.> Dhibaato kasta oo ku dhacda qalbiga, waa natiijada qalbiga oo ka fogaaday Ilaahay. Haddii qalbigu si joogto ah ula xiriiro Ilaahay, wax dhibaato ah kuma dhaceen.

Sharaxaad: Marka qalbiga laga furo xasuusta Eebbe, waxaa soo gala xanuun, walbahaar, murugo, iyo niyad jab. Laakiin marka uu Ilaahay la xiriiro, qalbiga wuxuu helaa badbaado iyo caafimaad.

17.> Haddii qofku jeclaado wax kale oo Ilaahay ka sokow — jacaylkaas wuxuu noqonayaa sabab uu u dhibaateeyo qalbigiisa. Waxa uu la kulmi doonaa xanuun, murugo, iyo muran.

Turjumid: Jacayl xad dhaaf ah oo wax Ilaahay ka sokow ah, wuxuu noqon karaa mushkilad: qofka wuxuu noqdaa mid ku xiran wax aan waarto, markaas wuxuu la kulmaa jebin, niyad jab, iyo murugo qalbiyeed.

18.> Sida qofka jirkiisa loogu baahanyahay daawo iyo nafaqo, qalbigana wuxuu u baahan yahay saddex:

Jacaylka Ilaahay

Xusuusta Ilaahay (dhikr)

Aqoon sax ah oo ku saabsan Eebbe

Sharaxaad: Saddexdan waxay u yihiin qalbiga sida biyaha iyo nafaqadu ugu yihiin jirka. Haddii midkood la waayo, qalbiga wuu bukaayaa.

19.> Qalbiga caafimaad qaba ma jecla wax Ilaahay ka cadhaysiinaya, waana ka fogaanayaa waxyaabaha Eebbe neceb yahay — xittaa haddii naftu u xiisto.

Turjumid: Qofka qalbigiisu wanaagsan yahay, wuxuu iska ilaaliyaa dambiyada, wuxuuna ka xishoodaa inuu Ilaahay dhiba. Haddii ay nafta doonayso wax xun, qalbigu wuu diidaa.

20.> Qalbiga toosan wuxuu yahay sida indhaha: haddii ay nadiif yihiin, way arkaan. Haddii ay wasakhoobaan ama dhaawacmaan, ma arkaan xaqa.

Sharaxaad: Qalbigana waa indhaha ruuxa — haddii uu nadiif yahay, xaqa wuu garanayaa, runta wuu fahmayaa. Haddii uu wasakhoobo (dambiyo, jahli, damac), wuu indha la' yahay oo xaqa wuu diidayaa.

21.> Haddii qalbigu uu toosnaado, jidhkuna wuu toosmaa. Haddii qalbigu qallooco, jidhkuna wuu qalloocdaa. Qalbigu waa boqorka, xubnaha kalena waa askartiisa.

Sharaxaad: Haddii qalbiga laga toosiyo, dhammaan afka, gacmaha, lugaha, iyo ficilladu way toosanayaan. Haddii qalbigu fowdo noqdo, xubnaha kale waxay sameeyaan dambiyo iyo khaladaad.

22> Cilmi la’aan iyo nafta oo raacda rabitaankeeda waxay sababi karaan in qalbigu u noolaado sida xoolaha — wax fahmo la’aan ah iyo hoggaan la’aan ah.

Tarjumid: Qalbiga banii’aadamka wuxuu khasaaro weyn gala haddii cilmi la’aan iyo damac la raaco. Waa sida neef aan hogaamiye lahayn — meel kasta wuu ku dhacayaa.

23.> Qalbigu wuxuu leeyahay afar xaaladood:

1. Nolol (naxariis ku jirta)

2. Dhac (la'aanta naxariista)

3. Xanuun (caafimaad darro)

4. Geeri (gaar ahaan qalbi gaaray xaalad xun)

Sharaxaad: Qalbi kasta wuxuu ku jiraa mid ka mid ah afarta xaaladood. Qalbiga nolosha leh waa kan Ilaahay xasuusta, caafimaadsanna waa kan damacii ka xoreeyay, laakiin kan dhintay waa midka ay buuxiyeen shaydaan iyo dunuub.

24.> Qalbiga dhintay waa mid aan dan ka lahayn xaqa, aan xasuusan Ilaahay, kuna mashquulsan rabitaanno iyo macaashi aan waari doonin.

Turjumid: Qalbiga noocaas ah wuxuu u shaqaynayaa sida mashiin. Wax toos ah uma jeedo xaqa, ma dareemo dambi, wuxuuna nolosha u arkaa keliya in la raaco nafta iyo waxa dunidu bixiso.

25.> Qalbiga xanuunsan wuu garanayaa waxa saxda ah, laakiin ma awoodo inuu raaco. Wuxuu garanayaa xumaanta, laakiin wuu la jecel yahay.

Sharaxaad: Tani waa xaalad aad u khatar badan: qofka wuu ogyahay waxa uu sameynayo inay khalad tahay, laakiin qalbigiisa xanuunsan ayaa jecel xumaanta — la mid ah bukaan la og yahay cuntooyinka wax dila, hadana sii cuna.

26> Qalbiga caafimaad qaba wuxuu leeyahay iftiin uu ku kala saaro xaqa iyo baadilka, wuxuu nafta ku cadaadiyaa inay raacdo jidka saxda ah.

Turjumid: Qofka qalbigiisu fayoow yahay wuxuu leeyahay "basri ruuxi ah" — garasho uu ku kala saaro wax kasta, wuxuuna xoog ku hayaa naftiisa si ay ugu toosnaato cibaado iyo akhlaaq suuban.

27.> Cilmi la'aan wuxuu dhalinayaa dhibaato badan. Qofka aan cilmi lahayn wuxuu u nugul yahay in qalbigiisu ku dhinto sababo uu isagu aan ogayn.

Sharaxaad: Waxaa laga yaabaa qof inuu qalbigiisu dhintay yahay isaga oo aan dareensanayn. Cilmi la'aantu waxay ka dhigtaa qofka mid indha la' ee ruux ahaan dhimay.

28.> Qalbiga caafimaad qaba wuxuu Ilaahay uga baqaa xitaa falalka uu is leeyahay waa wanaag, sababtoo ah wuu ka baqayaa in ay ku jiro is-kibir ama sumcad raadin.

Turjumid: Dad badan waxay sameeyaan camal wanaagsan, laakiin qalbiga caafimaadka qaba wuu iska hubiyaa camalkaas: ma Ilaahay ayaan u sameeyaa mise dadka ayaan is tusayaa? Is darsitaan joogto ah ayaa lagu gartaa qalbi nadiif ah.

29.> Qalbiga xanuunsan wuxuu jecel yahay in dadka la tuso camalkiisa, wuxuu neceb yahay in uu iskiis u sameeyo camal wanaagsan aan la arkin.

Sharaxaad: Marka aad aragto qof mar kasta rabitaankiisu yahay in la arko, in la maqlo, ama in laga mahadceliyo — waa calaamad qalbi xanuunsan oo aan rabin Ilaahay kaliya.

30.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu aamminsan yahay in guusha iyo toosnaantu ay ka timaado kaliya fadliga Ilaahay, mana isku kalsoona.

Turjumid: Qofka qalbigiisu wanaagsan yahay ma oranayo “anigaa fiican, anigaa cibaado badan,” wuxuu ogyahay in uu yahay addoon daciif ah oo u baahan Ilaahay mar kasta.

31.> Qofka qalbigiisu caafimaad qabo wuxuu markasta u hanqal taagayaa akhira, wuxuu jecel yahay inuu la kulmo Ilaahay, wuxuuna necbaa in uu Eebbe ka fogaado.

Sharaxaad: Qalbiga nadiifka ah wuxuu jecel yahay Aakhiro, wuu ka dheregay dunida, wuxuuna sugayaa la kulanka Ilaahay. Mar kasta wuxuu u diyaarsan yahay geerida — isagoo rajaynaya naxariista Eebbe.

32.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay u cibaadaystaa isaga dartii, ma aha si uu wax u helo oo kali ah ama dhibaato uga baxsado.

Turjumid: Qofka qalbigiisu toosan yahay, cibaadadiisu ma aha: “Ilaahay i sii,” ama “Ilaahay iga badbaadi.” Wuxuu Ilaahay u caabudaa maxaa yeelay Ilaahay waa u qalmaa in la caabudo, xattaa haddii uusan waxba helin.

33.> Qalbiga caafimaad qaba wuxuu ilaaliyaa waqtiga, wuxuu naftiisa ku mashquuliyaa waxa faa’iido u leh, wuxuuna neceb yahay dayaca iyo firaaqada.

Sharaxaad: Qofka qalbigiisu wanaagsan yahay waqtigu wuxuu u yahay dahab. Wuu ka faa’iidaystaa, wuxuuna neceb yahay ciyaar iyo waqtiga luminta. Wuxuu yaqaannaa in waqtiga uu yahay nolosha lafteeda.

34.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu runta ka dhigayaa toobadda, wuu isku eegaa qaladkiisa, wuuna ka xishoodaa Ilaahay.

Turjumid: Toobaddu ma aha keliya afka oo la yiraahdo “astagfirullaah”, qalbiga caafimaad qaba wuxuu dareemaa qoomamo dhab ah, wuxuuna si daacad ah u doonayaa in uu u laabto Ilaahay.

35.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa in uu had iyo jeer u baahan yahay Ilaahay, wuxuuna yaqaanaa in haddii Ilaahay hal daqiiqo isaga tago, uu halaagsami karo.

Sharaxaad: Qofka qalbigiisu toosan yahay wuxuu mar walba dareemaa tabar la'aan iyo baahi — wuxuu leeyahay: "Ilaahayow adigaa i toosin kara, adigaa i sugaya." Ma isku hallaynayo naftiisa mana ku kalsoona cibaadadiisa.

36.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu si joogto ah u fiiriyaa aayadaha Qur'aanka, wuxuu ka raadinayaa daawo iyo iftiin. Wuxuu Qur'aanka u arkaa warqad gaar ah oo Eebbe u soo diray.

Turjumid: Qur'aanku uma aha qofka qalbigiisu caafimaad qabo "buug la akhriyo oo kaliya," ee waa dhakhtar qalbiga daweeya, waa nabad iyo nur, waa fariin toos ah oo Eebbe ugu soo diray isaga.

37.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu jeclaa kalinimada (hal-u-noqoshada), wuuna ka fogaadaa buuq iyo is dhex yaac dad badan ah, si uu Ilaahay u xasuusto.

Sharaxaad: Qofka qalbigiisu wanaagsan yahay ma aha mid markasta rabay meel dad badan joogo — wuxuu jeclaa waqti uu kaligiis Ilaahay ula hadlo, kuna fekerayo naftiisa, dambigiisa, iyo Aakhiro.

38.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu xanuunsadaa marka uu dembi galo, wuxuuna dareemaa culays iyo murugo ilaa uu toobad keeno.

Turjumid: Dembi yar ayuu galay, qalbigiisa ayaa taagan! Wuxuu dareemayaa culays, wuxuu is leeyahay: "Sideen ugu dhicin Ilaahay?" Wuu ooyaa ama niyad jabaa ilaa uu dib ugu laabto Eebbe.

39.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa farxad iyo raaxo marka uu la kulmo salaadda, Qur'aanka, iyo xasuusta Ilaahay. Qalbiga xanuunsanna wuxuu ku farxaa madadaalada iyo dunuubta.

Sharaxaad: Farxadda qalbiga caafimaadka qaba waa salaad, Qur'aan, duco, iyo cibaado. Midka xanuunsanna wuxuu ku raaxaystaa waxyaabaha waqtiga laga waayo ee dunuubta keenaya.

40.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu xusuusan yahay dhimashada, qabriga, su'aalaha malaa'igta, iyo maalinta qiyaame. Wuxuu naftiisa u diyaariyaa safarka dheer ee Aakhiro.

Turjumid: Wuxuu ogyahay in noloshu aysan ahayn joogto. Mar walba wuxuu is leeyahay: "Waa ku jeer?" Wuxuu diyaarsadaa camal wanaagsan, dardaaran fiican, toobad, iyo akhlaaq suuban si uu ugu tago Eebbe isagoo diyaar

41.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu jecel yahay dadka wanaagsan, wuxuu u duceeyaa, wuxuuna ka xanuunsadaa dambigooda iyo khasaaradooda.

Sharaxaad:

Wuxuu qalbigu noqonayaa mid naxariis badan: dadka cibaadaysan wuu jeclaanayaa, kuwii dambiyada ku dhacayna wuu u murugoonayaa. Qalbiga nadiifka ahi ma necba dadka — wuxuu neceb yahay dambiyada ay sameeyaan.

42.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu si xushmad leh u qaabilaa wacdiga iyo waanada. Haddii wax laga sheego ama la toosiyo, wuu aqbalaa.

Turjumid:

Marka la waaniyo, qalbiga caafimaadka qaba ma xanaaqo, mana diido. Wuxuu leeyahay: "Ilaahay ha kaa abaalmariyo," wuxuuna isku dayaa in uu is toosiyo.

43.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu si hoose uga fekeraa aayadaha Qur'aanka. Ma aha akhrin kaliya, ee waa la milicsadaa, la dhuuxa.

Sharaxaad:

Wuxuu u akhriyaa Qur’aanka sidii fariin toos ah oo Ilaahay u diray. Aayad walba wuxuu is weydiiyaa: “Ilaahay maxuu igu leeyahay halkan?”

44.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa dareen gaar ah marka uu maqlo Qur’aan. Wuxuu noqonayaa mid dhoola caddeeya, ooya, ama gariira.

Turjumid:

Qalbigu wuu u nuglaadaa Qur’aanka — haddii uu maqlo, isbeddel ayaa ku dhaca. Mararka qaar wuu ooyaa, mararka qaarna wuu rajo yeeshaa. Waa nooc qalbi nool ah.

45.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu had iyo jeer ka fekeraa waqtigiisa, camalkiisa, iyo halka uu ku wajahanyahay. Ma aha mid ilaaway dhimasho iyo qabriga.

Sharaxaad:

Isaga oo jooga dunida, hadana wuxuu qalbigiisu mar walba la jiraa Aakhiro. Wuxuu leeyahay: “Camalkaygu ma i badbaadin doonaa? Waqtigeygu miyau khasaaray?”

46.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ku farxaa markuu dadku wanaag sameeyaan, wuxuuna murugoodaa markay dhibaato gasho ummadda Muslimiinta.

Turjumid:

Qalbigu waa mid dad jecel: wuxuu la farxaa wanaagga bulshada, wuuna la ooyaa markay musiibo gasho. Uma farxo dhibka dadka kale, mana jecel faan iyo kibir.

47.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay ka baryaa siduu u toosnaan lahaa, toobadna waa joogto. Ma rumeysan yahay in uu isagu ka badbaaday khalad.

Sharaxaad:

Mar walba wuxuu oranayaa: “Ilaahayow qalbigayga toosi, ha iga leexin xaqa, naftayda ha ii dhiibin.” Ma aha mid isku kalsoon, cibaadadiisana wuu ka cabsi qabaa.

48.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ka cabsadaa dambiga yar — sida uu qof cajiib ah uga cabsado inuu dhar cad ku fariisto dhul dhoobo leh.

Turjumid:

Dambiga yar ayuu u arkaa sida “biyaha yar ee wasakhda leh” oo hadduu qalbigu nadiif yahay, si fudud ayuu u wasakheeyaa. Sidaas darteed, si weyn ayuu uga feejigan yahay.

49.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu aaminsan yahay in guusha, toosnaanta, iyo badbaadada Aakhiro aysan imaan karin la’aanta naxariista Eebbe.

Sharaxaad:

Wuxuu ogyahay in camalkiisu kaligiis uusan ku filnayn, wuxuu kalsooni ku qabaa naxariista Ilaahay, sababtoo ah cidna xaq uma laha Janno la’aanteed fadliga Eebbe.

50.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu had iyo jeer ku dhex jiraa u dhawaansho Ilaahay, xasuus joogto ah, iyo laab jilicsanaan. Sidaas darteed, qalbigiisa waxaa hareeraysan iftiin iyo barako.

Turjumid:

Qalbigaas waxaa hareeraysan “nuur ruuxi ah,” naxariis, xasillooni, iyo degganaan. Wuxuu yahay qalbi Ilaahay la socda, Ilaahayna wuu barakeeyaa qofka qalbigiisa sidaas u toosan.

51.

> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay u caabudaa isagoo jecel, ka baqanaya, rajaynayana. Saddexdanna waa saldhigga cibaadada saxda ah.

Sharaxaad:

Wuxuu jecel yahay Ilaahay, wuuna ka baqaa in uu dembaabo, wuxuuna rajaynayaa raxmadiisa. Haddii mid kood maqnaado, cibaadadiisu way daciifaysaa.

52.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay u arkaa midka u xaqa badan jacayl, xushmad, iyo cabsi ku dhisan sharaf. Ma aha cabsi qof ka cararaya.

Turjumid:

Wuxuu Ilaahay ka baqaa isagoo is leh: "Ma jecli in aan caasinimo sameeyo anigoo og naxariistiisa iyo nicmadiisa." Ma aha baqdin kaliya oo ka timid ciqaab, ee waa cabsi jacayl ku dhisan.

53.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu si joogto ah isu eegiyaa. Wuxuu is weydiiyaa: "Maxaan sameeyay? Camalkaygu muxuu yahay? Ma Ilaahay ayaan raalli geliyay?"

Sharaxaad:

Wuxuu naftiisa kula xisaabtamaa maalin kasta. Ma is yiraahdaa "waan fiicanahay" — mar walba wuxuu ka baqaa in uu khalad galay, wuuna toobad keenaa.

54.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ka xishoodaa in Ilaahay uu siiyo nimco badan, isaga oo weliba sameynaya dambiyo. Wuxuu is leeyahay: “Sow ceeb ma aha?”

Turjumid:

Isagoo og in Ilaahay siiyay caafimaad, nolol, cunto, amni — hadana dambi galaya, wuxuu qalbigu dareemaa ceeb iyo xishood. Sidaa darteed, qalbiga nadiifka ah wuu ka shallaayaa dembiga.

55.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu jecel yahay in dadka wanaagga la baro, wuxuuna necbaa in dadka lagu khaldo baadilka iyo bidcada.

Sharaxaad:

Ma aha mid aamusan marka la khaldan yahay — wuxuuna ka xumaadaa marka xaqa la marin habaabiyo ama diinta laga beddelo. Wuxuu jecel yahay in dadka lagu hanuuniyo xaqa.

56.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ku farxaa markii Ilaahay la xuso, salaaddu la akhriyo, dadka la barayo xaqa, iyo runta la sheegayo.

Turjumid:

Wuxuu qalbigiisu farxad dareemaa marka uu maqlo magac Ilaahay, markuu arko camal wanaagsan ama daacadnimo. Wuxuu neceb yahay qallooca iyo beenta.

57.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu xasuustaa in waqtigu uu yahay hantida ugu qaalisan, wuxuu ka murugoodaa daqiiqad kasto oo ku khasaaraysa wax aan faa’iido lahayn.

Sharaxaad:

Markuu arko in uu waqti khasaaray, qalbigu wuu ka murugoodaa. Ma oggola in uu saacado ku dhumiyo madadaalo aan faa'iido lahayn. Mar walba wuxuu raadinayaa wax u taraya Aakhiro.

58.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ka farxaa wanaagga dadka kale. Ma xanaaqo haddii qof kale kheyr helo, ma necba dadka lagu sharfay.

Turjumid:

Waa qalbi aan masaylin. Wuxuu leeyahay: "Haddii Ilaahay kheyr siiyay walaalkay, ilaahay ha u barakeeyo." Qalbiga xanuunsan ayaa maseyso, kan caafimaadka qaba wuu duceeyaa.

59.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu si dhab ah u yaqaan in Jannadu u baahan tahay dadaal iyo naf hurid, Naartuna ay u dhowdahay hawada nafta.

haraxaad:

Wuxuu ogyahay in Jannadu lagu helo sabir, toobad, cibaado iyo ladnaansho la'aan. Wuxuu naftiisa u jeedinayaa in aysan raacin nafteeda, balse ay u dulqaadato culayska jihada Aakhiro.

60.> Qalbiga caafimaadka qaba ma jecla sumcad, amaan iyo in dadka ka raalli noqdaan. Wuxuu jecel yahay in Ilaahay kaliya ka raalli noqdo, xattaa haddii dadka kale diidaan.

Turjumid:

Ma rabin in la yiraahdo: "Waa nin wanaagsan, waa caalim, waa sheekh." Wuxuu qalbigiisu leeyahay: "Ilaahayow, adiga haku raalli noqoto — dadka haka xanaaqaan haddii ay rabaan."

61.> Ruuxa qalbigiisu caafimaad qabo waxa uu had iyo jeer dareemaa in uu ku jiro socdaal dheer – oo u dhexeeya nolosha adduunyo iyo Aakhiro.

Sharaxaad:

Wuxuu ogyahay in uu safar ku jiro. Gurigiisu ma aha adduunyo, mana dareemayo raaxo dhammaystiran ilaa uu gaaro guriga dhabta ah – Jannada.

62.> Qalbiga nadiifka ahi wuxuu Ilaahay ku jeclaanayaa isagu oo aan ku xirnayn kaliya nicmooyinka uu helay, balse wuxuu jeclaanayaa asaga (Ilaahay) naftiisa darteed.

Turjumid:

Jacaylkaas ma aha mid ku dhisan "waxaan ka helay" ama "wuxuu i siiyay," ee waa jacayl xaqiiqo ah, oo ku saleysan aqoon, qaddarin, iyo xaqiiqada Ilaahay.

63.> Qofka qalbigiisu caafimaad qabo wuxuu Ilaahay la yeeshaa cilaaqaad dhow – taasoo ka muuqata hadalkiisa, fikirkiisa, iyo camalkiisa.

Sharaxaad:

Mar walba Ilaahay ayuu la hadlaa, Ilaahay ayuu xusuustaa, Ilaahayna ayuu ku tiirsan yahay. Dabeecadiisa oo dhami waxay ka turjumaysaa in qalbigiisu la nool yahay Rabbiga.

64.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu yaqiinsan yahay in nolosha dhabta ah aysan ahayn midda adduunka ee ay tahay tan Aakhiro.

Turjumid:

Wuxuu u arkaa in tan adduunka ay tahay khayaali iyo imtixaan, balse nolosha dhabta ahi ay bilaabanayso marka qofku dhinto. Sidaa darteed, wuu u diyaargaroobaa.

65.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu neceb yahay khiyaanada, kibriga, faanka, iyo riyaalka (cibaado lagu sameeyo sumcad darteed).

Sharaxaad:

Qalbigaas wuu is daahiraa, wuuna naxariistaa. Ma jecla in dadka lagu kasbado cibaadada, mana samaynayo wax uu ku doonayo amaan ama sumcad.

66.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu jecel yahay runta xittaa haddii ay adagtahay, wuxuuna neceb yahay beenta xittaa haddii ay u muuqato mid sahlan.

Turjumid:

Wuxuu doorbidaa in uu runta sheego, runta maqlo, runta raaco — inkasta oo ay dhaawac u muuqato. Wuxuu yaqiinsan yahay in beenta ay keento burbur ruuxi ah.

67.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu yaqiinsan yahay in Eebbe aanu dayacin camal wanaagsan – xattaa hadduu yaryahay.

Sharaxaad:

Wuxuu u shaqeeyaa Eebbe isagoo og in xitaa hal kalmadood, ama hal toosin, ama hal dhibic oo barakaysan aysan lumin karin. Wuxuu leeyahay: "Ilaahay wuu ogyahay."

68.> Qalbiga caafimaadka qaba ma jecla is muujin – wuxuuna jecel yahay in camalkiisu noqdo mid u dhaxeeya isaga iyo Ilaahay oo kaliya.

Turjumid:

Wuxuu is qarisaa, mana doonayo in dadku arkaan wanaaggiisa. Wuxuu oran karaa: "Cibaadadaydu Ilaahay baa u arka, dadkuna ha arkaan sida caadiga ah."

69.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu fahamsan yahay in qalad walba laga toobad keeni karo ilaa nafta ka baxdo – wuxuuna fursad walba u arkaa in uu u laabto Rabbiga.

Sharaxaad:

Wuxuu leeyahay: “Ilaahay mar walba wuu furanyahay, waana toobad aqbale. Marka aan dembi galo, ima niyad jabiyo; waxaan u noqdaa isaga.”

70.> Qalbiga caafimaadka qaba ma xanaaqo marka la xasuusiyo ama la saxayo. Wuxuu ka faa’iidaystaa toosinta, wuxuuna oran karaa: “Jazaakallahu kheyr.”

Turjumid:

Marka la toosiyo, wuu mahadceliyaa. Ma oranayo: “Yaan la i saxin,” ama “Aniga khalad igama dhaco.” Wuxuu ogyahay in khaladka laga toobad keeni karo — saxiddana laga barto.

71.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ogyahay in dembiyada ay ka tagaan raad ruuxi ah, kaasoo keena mugdi, culays iyo ciqaab qalbiga ah.

Sharaxaad:

Markuu qofku dembi galo, qalbiga waxaa ku yimaadda madow iyo xannuun aan muuqan. Sidaas darteed, qalbiga caafimaadka qaba si dhaqso ah ayuu u toobad keenaa.

72.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ka baqaa dambiga yar sida uu uga baqo kan weyn. Wuxuu ogyahay in dambiyada yar-yar ay isu biiraan ilaa ay qalbiga burburiyaan.

Turjumid:

Qofka wanaagsan ma oranayo: “Waa dambi yar.” Wuxuu leeyahay: “Ilaahay baan caasiyay xattaa hadduu yaryahay.” Wuu is toosiyaa mar walba.

73.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu jecel yahay toobadda, isagoo arka in ay tahay nicmo uu Ilaahay u furay. Mana u arko ceeb inuu khaladkii toobad ka keeno.

Sharaxaad:

Wuxuu u arkaa toobadda inay tahay dariiq furmay, mana istixgeli karo in la yiraahdo “Sideed dib ugu noqotay Ilaahay?” — toobaddu waa sharaf, ceebna maaha.

74.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ka baqaa dambiyada qarsoon, kuwa aan la ogayn, sababtoo ah Ilaahay baa og. Wuxuu aad uga taxaddaraa dembiga u dhexeeya isaga iyo Ilaahay.

Turjumid:

Wuxuu ka baqaa sirta u dhaxaysa isaga iyo Rabbiga. Ma aha inuu dadka hortooda daahir noqdo oo kaliya — qalbigiisuu daahirsadaa xataa markuu kaligii yahay.

75.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ka xishoodaa inuu Ilaahay baryo isaga oo haddana caasiyiinaya. Wuxuu isku dayaa inuu la yimaado edeb cibaado iyo xushmad.

Sharaxaad:

Wuxuu leeyahay: “Sideen u baryaa Ilaahay oo aan ugu mahadceliyaa, anigoo haddana caasinimo ku jira?” Sidaa darteed, wuxuu naftiisa u tarbiyeeyaa, kuna hagaajiyaa edeb.

76.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu barya Ilaahay isagoo si dhab ah uga baahan. Wuxuu dareemaa faqri, tiirsanaan iyo jacayl. Ma aha baryo afka ka timid oo kaliya.

Turjumid:

Markuu ducaynayo, qalbigiisu wuu la ooyayaa. Wuxuu ogyahay in aanay jirin cid kale oo wax siin karta, badbaadin karta, ama jixinjixayn karta Ilaahay mooyee.

77.> Qalbiga caafimaadka qaba ma samro haddii uu waayo xidhiidhka Ilaahay. Wuxuu dareemaa in noloshii mugdi gashay. Wuxuu u ooyaa sidii ilmo waayay hooyadiis.

Sharaxaad:

Markuu ka fogaado Ilaahay, qalbigiisu wuu cadaadayaa. Wuxuu dareemayaa in wax walba noqdeen dhadhan la'aan. Markaasuu u soo noqdaa Ilaahay.

78.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu neceb yahay in uu faaniyo camalkiisa. Wuxuu ka baqaa in camalkiisu uusan noqon mid la aqbalo, xattaa haddii uu badan yahay.

Turjumid:

Wuxuu leeyahay: "Camalkayga Allaahu ma aqbalay?" Ma oranayo: "Waxaan sameeyay wax badan," wuxuu ka cabsanayaa riyal, kibir, iyo aqbalaad la'aan.

79.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu raadiyaa saaxiibbo wanaagsan oo xasuusiya Ilaahay, caawiya, la baraaruga, lana toosiya.

Sharaxaad:

Wuxuu iska ilaaliyaa saaxiibbada xun-xun ee waqtiga lumiyo, qalbiga madowga ka dhigo. Wuxuu jecel yahay dad u socda Aakhiro, ee ma jecla kuwa adduun ku xeeran.

80.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu si joogto ah isu eegiyaa, wuxuuna ogyahay in uu yahay qalbigiisa sababta badbaadada ama halaagga.

Turjumid:

Wuxuu si joogto ah u eegaa qalbigiisa: "Ma is rogay? Ma xumaaday? Ma iftiimayaa mise waa mugdi?" Wuxuu yaqiinsan yahay in qalbiga toosan yahay furaha guusha labada adduun.

81.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu had iyo jeer dareemaa in uu u baahan yahay hanuun joogto ah, sababtoo ah qalbigu wuu rogmadaa, wuu xumaadaa, wuu seexdaa.

Sharaxaad:

Qalbigu maaha mid joogto ah. Mararka qaar wuu diirran yahay, marna wuu qabow yahay. Sidaas darteed, qofka wanaagsan mar walba wuxuu baryaa Ilaahay:

"Yaa Muqallibal Quluub, thabbit qalbii cala diinika!"

("Ilaahow qalbiyada rogaya, qalbigayga diintaada ku sug.")

82.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu jecel yahay Kitaabka Ilaahay (Qur'aanka), wuxuuna la falgalaa sida qof jecel hadalka qof uu jecel yahay.

Turjumid:

Qofka qalbiga nadiifta ahi wuu jeclaanayaa Qur'aanka. Ma akhriyo si kaliya afka ah, wuxuu la ooyaa, la farxaa, oo uu ku fikiraa. Wuxuu leeyahay: "Tani waa hadalka Rabbigay."

83.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu neceb yahay in loo turjumo dembiga si uu u qumanyo. Wuxuu leeyahay: Dembi waa dembi, hana la yareyn.

Sharaxaad:

Qofka qalbigiisu caafimaad qabo ma raadsado cudurdaar:

"Waa waqtiga baa adkaa."

"Dadku waa sidaa."

"Qof walba wuu sameeyaa."

Wuu aqbalaa khaladkiisa, wuuna toobad keenaa.

84.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu aamminsan yahay in dhib walba oo yimaada uu Ilaahay leeyahay xikmad ku jirta, xattaa haddii aysan isha bani'aadamku arag.

Turjumid:

Wuxuu oran karaa: “Wax walba kheyr bay u yihiin.” Dhibka, murugada, dhimashada, fursad la’aanta – wuxuu ogyahay Ilaahay inuu wax ogyahay oo xikmaddu jirto.

85.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu u mahadceliyaa Eebbe marka uu waayo sida uu ugu mahadnaqo marka uu helo.

Sharaxaad:

Wuxuu ogyahay in imtixaanku isagu yahay nimco. Markuu waayo, wuxuu leeyahay:

“Alhamdulillaah calaa kulli xaal.”

("Mahad Ilaahay baa leh xaal kasta.")

86.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa farxad iyo daganaan markuu salaadda galo, wuxuuna u arkaa inay tahay nasasho, ma aha culays.

Turjumid:

Wuxuu sugayaa salaadda. Markuu takbiirta yiraahdo, qalbigiisu deg-degaa, oo wuxuu dareemaa in uu dunida ka baxay. Salaadda ma u arko hawl, ee wuxuu u arkaa raaxo.

87.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay ka baryaa in uu camalkiisa dhammaystiro, maxaa yeelay wuxuu ogyahay in camalku uusan qiimo lahayn Ilaahay aqbalkiisa la’aantiis.

Sharaxaad:

Camalka kaliya maaha muhiim — aqbalaadda ayaa muhiim ah. Wuxuu baryaa:

“Rabbi taqabbal minna.”

("Ilaahow naga aqbal.")

88.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ogyahay in dhimashadu ay tahay kulanka Ilaahay, wuxuuna diyaar u yahay inuu la kulmo Rabbigiis isagoo rajeynaya raalli ahaansho.

Turjumid:

Wuxuu yaqiinsan yahay in dhimashadu tahay bilow cusub, oo aanay ahayn dhammaad. Wuxuu diyaar u yahay — mana jecla inuu geerida ka cararo.

89.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ka mashquulsan yahay naftiisa toosinteeda, wuxuuna waqti yar siiyaa canbaareynta dadka kale.

Sharaxaad:

Wuxuu isku mashquuliyaa naftiisa. Ma fiiriyo dadka khaladkooda kaliya, wuxuuna leeyahay:

“Naftayda horay ha u marto.”

Ma noqonayo canbaarreeye, ee wuxuu noqonayaa tusaale.

90.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu jeclaan lahaa in dadka oo dhan badbaadaan, xittaa haddii isaga la ciqaabo, wuxuuna leeyahay qalbi naxariis badan.

Turjumid:

Waa sida Nabi Muuse (CS), markuu lahaa:

“Haddii aad halaagto dadkaas, anigana la iga tirtir!”

Wuxuu leeyahay qalbi damqada, kana murugooda halaagga dadka — wuu u duceeyaa oo wuu la jecel yahay kheyr.

91.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ku farxaa markuu arko Muslim kale oo wanaagsan, saliim ah, camal fiican leh — mana ka masayro kheyrka lagu siiyay.

Sharaxaad:

Wuxuu leeyahay: “Allahu Akbar, walaalkay kheyrkiisa Eebbe ha u badiyo!” Wuxuu ku farxaa kheyrka dadka kale sida uu ugu farxo kheyrkiisa. Masayr ma gelin qalbigiisa.

92.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ogyahay in camalka aan qalbiga kasoo bixin uusan la micno ahayn camal. Wuxuu ku dadaalaa in qalbigiisa iyo jidhkiisu is waafaqaan.

Turjumid:

Wuxuu is weydiiyaa: "Tukashadaydu miyaan la socdaa khushuuc?" "Duco aan qalbi la socon ma la aqbalayaa?" Wuxuu ka shaqeeyaa in qalbigu horreeyo.

93.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu nacaa halgan aan Ilaahay loogu jirin. Dhammaan dadaallada aan loogu talagalay Aakhiro wuxuu u arkaa khasaaro.

Sharaxaad:

Wuxuu ogyahay in shaqo kasta oo aan ujeedkeedu ahayn raalli ahaanshaha Ilaahay — ay tahay mid qashin ah, xittaa haddii ay dadku u sacbiyaan.

94.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ogyahay in weli laga sugayo xisaab iyo su’aalo — sidaa darteed wuu la xisaabtamaa naftiisa intuu nool yahay.

Turjumid:

Wuxuu leeyahay: "Maanta aan naftayda la xisaabtamo intaan la i xisaabin berri." Wuxuu is waydiinayaa maalin walba: “Maxaan sameeyay? Maxaan dayacay?”

95.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay u yaqaannaa Magaciisa, Sifadiisa iyo Ficilladiisa — taasoo jacaylka Ilaahay si qoto dheer ugu beerta.

Sharaxaad:

Ma aha in uu keliya maqlo "Allaah waa Naxariis Badan." Wuxuu fahmaa magacyadaas, sifooyinkaas, wuxuuna ku fekeraa, taasna waxay qalbiga dhalaalisaa.

96.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ka yaabaa in camal fiican laga hor istaago, maxaa yeelay wuxuu ogyahay in dembiyo qarsoon ay saameeyaan camalka muuqda.

Turjumid:

Wuxuu leeyahay: "Malaha qalad aanan dareemin baa iga xiran kheyrka." Markuu arko inuu ka haray salaad jamaac ah ama cibaado kale, naftiisa ayuu baaraa.

97.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu neceb yahay caajisnimo iyo dib u dhigis camalka wanaagsan, wuxuuna ka cararaa kalsoonida been ah.

Sharaxaad:

Wuxuu ogyahay in kalsoonidu aanay ahayn: "Ilaahay wuu I dambi dhaafayaa." Wuxuu leeyahay: "Aan camal sameeyo si uu ii dambi dhaafo." Ma sugo waqtiga ku habboon.

98.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ogyahay in nolosha adduunka ay tahay tijaabo. Wuxuu la mid yahay qof safar ah oo meel nasasho yar ku hakaday.

Turjumid:

Ma raaxaysto sida qof degay. Wuxuu u nool yahay sida qof socda, "maanta halkan baan joogaa, berri waan sii soconayaa." Uma arko nolosha in la dhiso si joogto ah.

99.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay uga jeclaadaa Jannada. Maaha Jannada waxa uu rabay — ee waa in Ilaahay la kulmo, la arko, lagana raalli noqdo.

Sharaxaad:

Jannada uma jecela cuntadeeda iyo raaxadeeda oo kaliya — wuxuu leeyahay: “Waa meesha aan Ilaahay ku arki doono. Taasi baa iigu filan.”

100.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu fahmayaa in sabirka, toobadda, salaadda, iyo tawakalka ay yihiin quudka qalbiga. Wuxuu si joogto ah ugu cunteeyaa camalkaas.

Turjumid:

Siduu jidhku ugu baahan yahay cunto iyo biyo, qalbiguna wuxuu u baahan yahay sabir, toobad, xusuus, tawakal, iyo duco. Haddaan taas helin, qalbigu wuu dhimanyahay.

101.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa culays marka uu qalad sameeyo, xattaa haddii dadku u sacbiyaan.

Sharaxaad:

Qalbiga noocaan ah kuma raysto ammaan been ah. Haddii dadku yiraahdaan “waa fiican tahay,” qalbigu wuxuu leeyahay: “Laakiin Ilaahay ma iga raalli yahay?” Wuxuu dareemaa culeys gudaha ah.

102.> Qalbiga caafimaadka qaba ma quustiyo naftiisa, wuxuuna rajeynayaa in Ilaahay dambi dhaafo xattaa dembiga ugu weyn.

Turjumid:

Wuxuu yaqiinsan yahay Aayadda:

> “Ha ka quusan naxariista Eebbe!”

Wuxuu isku dhiibaa Eebbe, wuxuuna leeyahay: “Ilaahay wuu iga weyn yahay dambigayga.”

103.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa in khayr kasta oo uu sameeyo uusan isagu keenin — ee uu Eebbe yahay sababta.

Sharaxaad:

Wuxuu oranayaa: “Haddii aan sadaqo bixiyay, Ilaahay baa igu hanuuniyay.” “Haddii aan toosay, Eebbe baa i toosiyay.” Wuu u mahadceliyaa Ilaahay, ma u bogto naftiisa.

104.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu is barbardhigaa dadka ka sarreeya camalka, si uu u horumaro – ma is barbardhigo kuwa liita.

Turjumid:

Ma oranayo: “Dad baa ka xun aniga.” Ee wuxuu leeyahay: “Dad baa iga fiican, aan ku daydo.” Wuxuu ku dadaalaa tartan kheyr ah.

105.> Qalbiga caafimaadka qaba ma jecla ammaan badan, wuxuuna ka baqaa in lagu kaco kibir iyo isku filnaan.

Sharaxaad:

Markuu maqlo: “Adigu waad fiican tahay,” qalbigiisu wuxuu leeyahay: “Allahayow i sug, hana iga dhigin mid isku hallaynaya camalkiisa.”

106.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay u yaqaannaa mid si gaar ah u dhow, mana u arko Ilaahay mid fog ama aan maqleyn.

Turjumid:

Wuxuu Ilaahay u arkaa mid dhow. Waa uu la hadlayaa, la ooyayaa, la barooranayaa. Ma dareemo cidlo — xittaa hadduu keligii yahay, Ilaahay ayuu la jiraa.

107.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay ka jeclaadaa cid walba — cid kastana wuxuu jecel yahay keliya haddii ay Ilaahay jeceshahay.

Sharaxaad:

Jacaylkiisu wuxuu ku salaysan yahay diinta. Haddii qof Ilaahay u dhow yahay, qalbigu wuu u janjeeraa. Haddii kale, xiriirku wuu yaraadaa — xattaa haddii ay qaraabo yihiin.

108.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu dareemaa in duco la'aanteed uusan waxba ahayn.

Turjumid:

Wuxuu yiri:

"Ducadu waa hubka mu'minka."

Wuxuu joogto u ducaystaa, ma aha oo keliya markuu dhib ku jiro.

109.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay si daacad ah ugu jeedaa xattaa haddii uu khalad sameeyo, sababtoo ah wuxuu yaqaan in Ilaahay yahay Naxariis Badan.

Sharaxaad:

Qofka qalbigiisu nadiif yahay wuxuu leeyahay: "Waan dhacay, laakiin Ilaahay baa iga jecel inaan toobad keeno." Mar walba wuu u laabtaa Ilaahay.

110.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu leeyahay xiriir qarsoon oo Ilaahay kala dhaxeeya oo aan dadka kale arag.

Turjumid:

Waxaa jiro duco, oohin, toobad, iyo niyad laabasho u dhexeysa isaga iyo Rabbigiis oo aan qofna ogayn. Waa xiriir khaas ah.

111.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu naxariista dadka kale, xattaa kuwa qaladkooda la og yahay.

Sharaxaad:

Ma oranayo: “Waa faasiq, isagaa istaahila.” Wuxuu leeyahay: “Ilaahow u hanuuni.” Wuxuu rajaynayaa kheyrka dadka kale.

112.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu niyad jabaa markuu dayaco waqti, sababtoo ah wuxuu ogyahay in waqtigu yahay nolosha ugu qiimaha badan.

Turjumid:

Markuu waqti khasaaro, qalbigu wuu dhaawacmaa. Wuxuu leeyahay: “Waqti ayaa iga lumay, taasoo aanan heli doonin mar kale.”

113.> Qalbiga caafimaadka qaba wuu ka cararaa ballan jabka iyo beenta.

Sharaxaad:

Wuxuu ilaaliyaa ballanta, xitaa haddii aysan cid ogayn. Wuxuu ogyahay in Eebbe arko. Wuxuu runta ka dhigaa mabda’ nololeed.

114.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu ku xiran yahay Aakhiro — wuxuu yaqaanaa in adduunku yahay tijaabo, ma aha abaalmarin.

Turjumid:

Wuxuu la nool yahay yaqiinta: “Nolosha dhabta ahi waa Aakhiro.” Hantida, kursiga, guusha — kuma mashquulo haddii aysan Aakhiro faa’iido u lahayn.

115.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu la ooyaa mararka qaar isagoo aan sabab muuqata jirin — qalbigaa xusuusanaya Allaah.

Sharaxaad:

Markuu Qur’aan maqliyo, ama kaligiis fadhiyo, ilmadu si kedis ah ayey u imaan kartaa. Waa qalbi nool oo Alle la dareemaya.

116.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa khatar markuu camalkiisu badiyo — wuuna ka cabsadaa kibirka iyo riyaada.

Turjumid:

Wuxuu is leeyahay: “Miyey dad u arkaan inaan camal badan leeyahay? Miyey naftaydu is leedahay waad fiican tahay?” Wuxuu Ilaahay baryaa inuu iska qariyo.

117.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dareemaa in guusha dhabta ahi tahay inay Ilaahay kaa raalli noqdo, ma aha guulaha muuqda.

Sharaxaad:

Ma oranayo: “Waxaan helay lacag, ama dad baa i aqoonsan.” Wuxuu leeyahay: “Haddii Ilaahay iga raalli yahay, intaas baa iga filan.”

118.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu Ilaahay u jeclaadaa isagoo aan u jecleyn ujeedo kale.

Turjumid:

Wuxuu Ilaahay u jecel yahay sababtoo ah Ilaahay waa Ilaahay. Ma aha sababtoo ah rajo iyo cabsi oo keliya — jacayl daahiran ayuu leeyahay.

119.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu maalin walba la imaanayaa camal uu Ilaahay kaga dhowaado — xattaa haddii uu yaryahay.

Sharaxaad:

Maalin walba wuxuu sameeyaa camal wanaagsan — salaad, Qur’aan, sadaqo, duco, amar wacan, ceeb daboolid — xataa hadduu yar yahay.

120.> Qalbiga caafimaadka qaba wuxuu dhimanayaa isagoo Ilaahay xasuusanaya.

Turjumid:

Wuxuu doonayaa inuu dhinto isagoo leh:

“Laa ilaaha illa Allaah.”

Wuxuu Ilaahay weyddiistaa in geerida ugu dambeysa ay noqoto xaalad uu Ilaahay la jiro.

Gunaanad & Duco

Qof kasta oo buuggan akhriya, fahma, kuna fekera, waxaan ka baryayaa Eebbe subxaanahu watacaalaa inuu ku anfaco, qalbigiisana nadiifiyo, naftiisana toosiyo. Ilaahay ha ka dhigo mid wax ka faa'iiday, dadkana u faa'iideeya.

Haddii aad wax ka heshay, ha xajin — la wadaag walaalaha kale, si aad ugu biirto dadka kheyrka faafiya.

Wax kasta oo sax ah waa fadliga Ilaahay, waxa aan ka dhacsanahayna waa iga raalli ahaansho, waana idinka cudur daaranayaa.

Turjuma: Abdulkadir Yusuf Mohamed

Sanad: 2025